# OGAYSIIS XUQUUQDA WAALIDKA/ARDAYGA EE HOOS YIMAADA XEERKA 504 (ARJIGA 504-1)

Heerka dib u habaynta 1973 ee loo yaqaano ayadoo loo iigaayo“section 504” waa xeer Barlamaanka Maraykanku soo saaray oo lagu mamnuucayo in qof la cunsuradeeyo. Ujeedada xeerkani waa in ardayda laxaadka le'i ay helaan fursado waxbarasho iyo xanaanayn la mida ka ardayda kale helaan.

Kani waa ogaysiis xuquuqda aad ku leedahay xeerka 504. Warqadan loogama jeedo in lagu muujiyo xuquuqda ay ardayda laxaadka le'i ku leeyihiin xeerka Waxbarashada Curyaamiinta (IDEA) ee tacliinta khaaska ah. Qusaysa ardayda da wax barashada cuuryanimo xaq u leh sida uu qiixayo xaafiiska mamulaha guud ee dugsiyada amaba OSPI looyaqan. Xeerarka uu Xafiiska Kormeeraha Tacliinta Dadwaynuhu raaco ee lagu ilaalinayo xuquuqda ardayda iyo qoyskooda waxaad ka helaysaa dhamaan Waaxaha la xiriira Tacliinta Khaaska ah, waananu ticgalinaa xuquuqda curyaanka ee ku xusan sharciga IDEA. Ujeedada ogaysiiskani waa in loogu muujiyo qofka laxaadka, xaga maskaxda ama jidhka la xuquuqda uu ku leeyahay xeerka 504, xataa hadii uuna xaq u lahayn xeerka IDEA.

Xeerarka dawlada dhexe ayaa waalidka iyo ardayda siinaya xuquuqahan hoos ku xusan:

1. Waxaad xaq u leedahay in Dugsiyada dagmada seattle aykuu sheegaan xuquuqda aad ku leedahay xeerka 504 (uujeedada Ogaysiiskani waa inaan xaquuqdaa kaala talino).
2. Waxaad xaq u leedahay in ilmahaagu ka qaybqaato kana faa'iidaysto barnaamijyada waxbarasho ee Degmadu bixiso isagoon wax cunsuriyada lagu samayn.
3. Waxaad xaq u leedahay in Degmadu kusoo ogaysiiso ka hor intaanay qaadin wax ficila oo ku saabsan baadhitaanka iyo ama kuqorida ilmaha barnaamij kale.
4. Ilmahaagu wuxuu xaq u leeyahay in la baadho intaan lagu qorin 504 iyo markasta oo wax laga badalayo barnaamijkiisa waxbarasho. Waxaad xaq u leedahay inaad diido baadhista hore iyo baadhista danbe ee ilmaha fasalka lagu qorayo.
5. Waxaad xaq u leedahay inaad ilmahaaga u hesho tacliin ku haboon oo bilaasha (FAPE). Waxaad xaq u leedahay in ilmahaagu wax la barto ardayda aan laxaadka la'ayn marka ay suurto gal tahay. Waxa kale oo aad xaq u leedahay in ilmahaagu ka qayb galo dhacdooyinka ay degmadu u qabanayso ardayda ee khuseeya tacliinta tiiyoo la siinayo wixii adeega ee uu u baahan yahay, iyadoon wax kharasha oo dheeraada lagaa qaadayn, kan waalidka/wakiilka kale bixiyaan mooyaane.
6. Ilmahaagu wuxuu xaq u leeyahay in loo fududeeyo siduu uga qayb qaadan lahaa ciyaaro lamida kuwa ardayda aan laxaadka la'ayni ciyaaraan.
7. Waxaad xaq u leedahay in hay'ado kala duwani ku sameeyaan baadhitaan ilmahaaga, go'aanka fasalka lagu qorayana ay gaadhaan kooxo aqoon u leh ilmahaaga iyo warxinta laga laga soo qoray oo dhan.

8. Waxaad xaq u leedahay inaad ilmahaaga u hesho fursal uu kaga qayb galo waxyaabaha waxbarashada ka baxsan ee Degmadu u fidiso ardayda kale.

9. Waxaad xaq u leedahay inaad fiiriso koobina lagu siiyo faylasha waxbarashada ilmahaaga. Waxa kale oo aad xaq u leedahay in lagaaga soo jawaabo laguuna sharaxo laguuna turjumo rikoodhka waxbarashada ilmahaaga.

10. Waxaad xaq u leedahay inaad Degmada ka codsato inay wax ka badalaan warbixinta tacliinta ilmahaaga, hadii aad u malayso inay ku jiraan waxyaabo aan sax ahayn, beena ama ka hor imanaya xeer shakhsiyeedka ilmaha. Hadii Degmadu diido inay wax ka badasho waxaad xaq u leedahay inaad u dacwooto Heerarka ilaaliya Tacliinta Qoyska ee la yidhaa (FERPA).

11. Waxaad xaq u leedahay inaad codsato dhexdhexaadiyeyaal hadii Degmadu qaadato ficilo ku saabsan baadhista, ama fasalka ilmahaagu wax ku baranayo ama in qarreen kuu raaco kulanka lagu dhagaysanayo dacwadaada.

12. Hadii aad rabto inaad ka dacwooto xaqiijinta, baadhista iyo/ama fasalka lagu qoray in ilmahaagu wax ku barto, waa inaad warqad qoraala usoo gudbisaa oo aad ku codsanayso in dacwadaada la dhegaysto adoo kusoo hagaajinaya Carole Rusimovic oo ah isku duwaha barnaamijka 504, MS 32-151, P.O. Box 34165, Seattle, Washington 98124-1165 adoo isticmaalaya arjiga joojinta gargaarka ee (Form 504-7). Waxaa dhagaysan doona dacwadaana masuul dhexdhexaad ka ah dacwada, qoraal baana laguula soo socod siin doonaa taariikhda, wakhtiga iyo madasha dacwada lagu dhagaysanayo.

13. Hadii aad ku qanci waydo go'aanka dhexdhexaadiyeyaasha waxaad xaq u leedahay in maxkamadi dib u eegin ku samayso go'aanka. Hadii aad dacwo kaga guulaysato Degmada waxaad xaq u leedahay inaad codsato in laguu magdhabo wixii kharash kaaga baxay sida qarreenka lacagtiisa adoo maraya maxkamada.

14. Waxaad xaq u leedahay inaad cabasho u gudbiso Xafiiska xuquuqda shicibka ee Hay'ada Waxbarasha ama maxkada dawlada dhexe. Cinwaanka xafiiska masuulka ka ah ee magaalada Seattle hoos timaadaa waa:

U.S. Department of Education
Office of Civil Rights
915 Second Avenue, Room 3310
Seattle, Washington 98174-1099
Phone: (206) 607-1600
Website: www.ed.gov/OCR
Email Address: OCR.seattle@ed.gov